

Baalasha soo socda waxaad ka helaysaa macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan sida loo isticmaalo VPN-ka iyo barowsarka Tor, oo ay la socoto meelaha rasmiga ah ee lagala soo degi karo ablikeyshanadan.

Halkaan ka ogow wax badan oo ku saabsan arintaan! →

#KeepItOn 

VPN-YADA LACAG LA'AANTA AH SIDA FUDUDNA LAGU ISTICMAALI KARO

CUSBOONEYSIIN: : JUNE 2021



LACAG
LA' AAN

P S I P H O N

Isticmaal si aad uga
gaashaamato faafreebka

LAGU ISTICMAALI KARAA

→ Android 4.0 iyo
wixii ka sareeyaa
→ iOS 10.2 iyo wixii
ka sareeyaa

→ Windows
(XP/Vista/7/8/10)
→ macOS 11.0 iyo
wixii ka sareeyaa
(Leh M1 chip)

HOOS KU DHUFO SI AAD
ULA SOO DEGTO

<https://psiphon.ca/download.html>



LACAG
LA' AAN

L A N T E R N

Isticmaal si aad u furato
Internet dheeereyya, la isku
haleyn karo amaana ah

LAGU ISTICMAALI KARAA

→ Android 4.4 iyo
wixii ka sareeyaa
→ iOS 12.1 iyo wixii
ka sareeyaa

→ Windows (XP/SP3)
→ macOS 11.0 iyo
wixii ka sareeyaa
(leh M1 chip)
→ Linux Ubuntu

HOOS KU DHUFO SI AAD
ULA SOO DEGTO

<https://getlantern.org/>



LACAG
LA' AAN
si kooban

P R O T O N V P N

VPN xawaare sareeyaa oo
ilaaliya asturnaanta

LAGU ISTICMAALI KARAA

→ Android 5.0 iyo
wixii ka sareeyaa
→ iOS 11.0 iyo wixii
ka sareeyaa

→ Windows
→ OSX
→ Linux

HOOS KU DHUFO SI AAD
ULA SOO DEGTO

[https://protonvpn.com/
download](https://protonvpn.com/download)



T U N N E L B E A R

VPN kusiinaya barowsar
gooni ah bilaa fure ah

LAGU ISTICMAALI KARAA

→ Android 4.1 iyo
wixii ka sareeyaa
→ iOS 8 iyo wixii ka
sareeyaa

→ Windows 7 iyo wixii
ka sareeyaa
→ Mac OS 10.10 & wixii
ka sareeyaa

HOOS KU DHUFO SI AAD
ULA SOO DEGTO

[https://www.tunnelbear.com/
/](https://www.tunnelbear.com/)

Sidoo kale waxaa lagu isticmaali
karaa barowseradan hoose:-
CHROME | FIREFOX | OPERA

#KeepItOn

<https://www.accessnow.org/keepiton/>



T O R B R O W S E R

Isticmaal si aad isaga ilaalso raadraaca, dabogalka iyo faafreebka lagaaga sameyn karo dhanka isticmaalka Internet-ka

WAXAAD KU ISTICMAALI
KARTAA



→ Android



→ Windows

→ OSX

→ Linux

HOOS KU DHUFO SI AAD ULA SOO DEGTO

<https://www.torproject.org/download/>

Tijaabinta tegitaanka ama go' itaanka Internet-ka.

Aad bay u adag tahay inaad ogato macnaha farsamo ee ka danbeyn kara marka khadka internet-ku kaa tago ama booqan kari weydo websaydyo gooni ah, adeegyo ama ablikeyshano. Sidaas darteed, waxaa jira hab caalami ah oo lagu cabiro Internet-ka oo ku siinaya hannaan iyo xog kaa caawinaysa inaad baarto sababaha keenay khalkhalka.

Waxaad tijaabin kartaa khadka adigoo isticmaalaya [OONI Probe app](#), kaasoo kuu sahlaya inaad ogato una heshid caddeyn sababaha kala duwan ee keenay tegitaanka khadka internet-ka ama xannibaada saaran adeegyo gooni ah.

Bal aynu isla eegto OONI Probe tusaale ahaan →



OONI

Qaab aad ku tijaabin kartid in websaydyada, baraha bulshada ama VPN-ku xanniban yihiin iyo in kale.

OONI WAXAAD KU ISTICMAALI KARTAA



Android & iOS

<https://ooni.org/install/mobile>



Windows, macOS, Linux

<https://ooni.org/install/desktop>

Euro lifaaqan si aad ugu hubiso xannibnaanta baraha bulshada
<https://accessnow.org/ooni-test-social>



WARGELIN

1. Markaad isticmaaleyso abka OONI wuxuu kaaga baahan yahay inaad iska xirto VPN-ka ku furan.
2. Isticmaalidiisu waxay wadan kartaa khatar. Qof kasta oo dabagal ku haya Internet-kaaga (ha noqoto shirkadda khadka Internet-ka bixisa, dowladda, ama cidaad u shaqeyneysid) waxay arki karaan inaad isticmaleysid OONI iyo websaydyada aad ku gelaysid.
3. Markaad isticmaaleyso wuxuu dabcan kaa cunayaa lacag Internet-ka sida adeegyada kale oo kale.



WAXAAN KUGULA TALINEYNAA

1. Inaad wax ka ogaato khataraha ku geedaaman abka OONU inta aadan soo degsan.
2. Iska xir dhammaan barowsarada, shaqooyinka kale iyo VPN-ka inta aadan kicin abka OONI si aad u isticmaashid.
3. Iska ilaali ku isticmaalida waafayga gurigaaga ama shaqada. U war hay isticmaalka lacagta markaad ku isticmaaleyso khadka telefoonka.

Macluumaaad dheeri ah, oo uu kuijro khataraha, boooqo
<https://ooni.org/>

Baro noocyada kala duwan ee lagu khalkhalgeliyo khadka isgaarsiinta iyo siyaabaha looga hortagi karo.

Waxaad ka gaashaaman kartaa noocyo badan oo lagu khalkhalgeliyo khadka Internet-ka adigoo isticmaalaya hababka-baxsan, sida barowsarka Tor, Khadka Internet-ka ah ee fog (VPN), iyo habab kale oo isticmaala hannaanka qarsoon (encryption). Jaantuuska soo socda ayaa ku tusinaya noocyada khalkhalka khadka Internet-ka ee kugu iman kara iyo siyaabaha kaa caawin kara inaad ka gaashaamato si aad ugu sii xirnaato khadka.

Bal aynu isla eegno →

#KeepItOn 

Calaamadaha	Nooca khalkhal ee lagu jari karo khadka Isgaarsiinta	Hababka looga gaashaaman karo
Dhammaan websaydyadii oo aan gelayn. Khadkii Internet-ka oo maqan.	Maqnaansho buuxa: waa khadkii isgaarsiinta oo si buuxda u go'an oo ku dhacday khalkhalgelin ku talo-gal ah sida korontadii, birihii telefoonada ama adeegii khadka oo la demiyey	Hadday macquul tahay, ka hel wadanka deriska ah kaar ku shaqeeya xiriirinta (roaming). Kuwaasoo khadkooda isgaarsiintu kuu shaqeynayo kuna soo gaari karo. Si aad ula xiriirto dadka kugu dhow, waxaad lasoo degi kartaa ababka wax qariya sida Briar (Androad keliya) iyo Bridgefy ama aaladaha sida goTenna .
Websaydyadii iyo ababkii oo noqday kuwo culus, hooseeya oo isticmaalkooda kugu ridayo madax xannuun. Wax soo dejinta ama dirista oo qaadaneya waqtii ka badan intay qaadan jirtay.	Dibindaabyeyn: waa yareynta xawaaraha khadka si ku talo-gal ah, si cida isticmaalaysa uga huleelo soo dejinta iyo dirista macluumaad	Waxaa jira qaabab badan oo wax loo dibindaabyeeyo, qayb kamid ahna ay adag tahay in laga gaashaanto. Si aad uga gaashaamato, waxaad isticmaali kartaa VPN si aad uogaato bal in xawaaraha khadla wax laga bedelay.

Calaamadaha	Nooca khalkhal ee lagu jari karo khadka Isgaarsiinta	Hababka looga gaashaaman karo
Markaad websayd gashid, waxaa kusoo baxay fariin oraneysa "khadku maahan ammaan – the connection is unsafe" ama "DNS Server Not Responding" ama muuqa webka oo u muuqda mid waalan, ka duwan, ama aan u shaqeynayn si caadi ah.	Xannibidda DNS iyo sumeynta DNS: waa kharibidda nidaamka lagu galo websaydka, siddaas darteed markaad damacdo inaad gasho websaydka wuxuu kuu leexinayaa meel khaldan	Iskuday inaad isticmaasho VPN la isku halleyen karo. Soo degso, tijaabina mid ka badan haddiiba qaybo kamid ah shaqeyn waayaan. Waxaaad sidoo kale isticmaali kartaa DNS server aamin ah adigoo kaashanaya bulshada rayidka ah ee bixisa caawimaadaha arintaas la xiriira. Waxaaad sidoo kale kuu furan inaad eegto IP-ga websaydka.
Websaydka/abkii ama firshin kamid ah oo aan la heli karin, ama tusmada kuu muuqata oo ka duwan kan dadka wadamada kale u muuqata. Tusaale, sida inaad websaydka ku geli kartid dhabada HTTP oo aan laguu oggoleyn inaad ku gasho dhabada ammaansan ee HTTPS.	Jidgooyo khadka: waa iyadoo la isticmaalayo jidgooyo dhexe oo lagu talaashay wadada ammaanka ah ee khadka isgaarsiintu sii maro sida HTTPS	Halkam oo kale waxaa ku caawin kara VPN la isku halleyen karo. Sidoo kale waxaaad u wareegi kartaa shirkad kale oo bixisa adeega isgaarsiinta, sida inaad u wareegto khadka tooska ah halkii aad ka isticmaali jirtay khadka telefoonka.

Calaamadaha	Nooca khalkhal ee lagu jari karo khadka Isgaarsiinta	Hababka looga gaashaaman karo
Qaybo kamid ah ab gooni ah, adeeg, ama websayd oo aan shaqeynayn ama la heli karin (Tusaale, inaad sameysan kartid kooto cusub, laakiin aadan geli karin), iyadoo ababkii ama adeegyada kale oo dhan caadi u muuqdaan.	Roondeyn Qoto Dheer – Deep Packet Inspection (DPI): waa iyadoo la isticmaalayo jidgooyo si loogu xado xog faahfaahsan oo ku saabsan waxa dhixmara toobiyaha khadka isgaarsiinta, loona isticmaalo xogtaas in lagu xannibo xog gooni ah inay toobiyaha marto.	Hadaad ogtahay waxa la beegsado, waxaad awoodi kartaa inaad dib isugu-xirtid. Waxyaalahda daawada u noqon kara waxaa kamid ah isticmaalidda VPN la isku halleyn karo, isticmaalidda hannaanka wax wareejiya sida barowsarka Tor, ama u wareegidda shirkad kale oo adeega Internet-ka bixisa.
Websaydka ama abka aad isticmaaleyso oo aad u hooseeya, ama aan soo kaceyn. Marar shaqeynaya, mararna aan la heli karin siina cuslaanaya marba marka kasii danbeysa.	Diidmo Adeega: waa iyadoo lagu ciriirinayo server-ka webka ama wax la xiriira websaydka ama abka dalabyo badan oo keena inuu cuslaado ama hawada ka baxo	Iskuday inaad adeega ama websaydka ka booqato/ ka gasho wadan kale adigoo isticmaalaya VPN. Wuxaan sidoo kale isku deyi kartaa inaad qorto lambarka (IP) websaydka intii aad qori lahayd magaca.



Wargelin Muhiim ah

VPN-ku wuxuu kaa caawin karaa inaad ka weecato xannibaad saaran websaydyada ama adeegyada internet-ka oo ay kujiraan adeegyada khaaska ah sida baraha bulshada, ablikeyshanada fariimaha la isugu diro. Horay ula soo deg dhowr VPN, hadaad maleynayso khatar in khadka internet-ka la deminayo / jarayo.

Maahan in VPNs-ka oo dhan kuu damaanadqaadi karaan ilaalinta sirtaada ama ku siinayaan ilaalin isku-mid ah. Markaad dooraneysid bixiyaha VPN-ka, qaado nooca isha furan (open source) oo koorarkiisa la heli karo kana run sheegaya sida ay ku ilaalinayaan xogtaada. Waad inaad sidoo kale hubisaa in VPN-kaas ay dadku si furan talo uga dhiiban karaan ama qiimeyn ugu sameyn karaan ammaankiisa, sidoo kale ay ammaankiisa hubiyaan baarayaal madaxbannaan. Akhri [buug-yarahan](#) ay diyaarisay EFF si uu kaaga caawiyo inaad doorato VPN-ka ku habboon xaaladaada goonida ah.

Ogow: in shirkadda internet-ka ku siisa, ama dadka kale kujira dalladaada inay sheegi karaan hadaad isticmaaleysو VPN ama Tor. Wadamada qaarkood isticmaalka adeegyadan waa sharci darro ama waxaa dulsaaran xakameyn. Iska hubi inaad tixgeliso khatar sharci ama shaqsiyadeed oo kaaga iman karta isticmaalka adeegyadan.

TRANSLATED BY | WAXAA TURJUMAY



#KeepItOn 